
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



## Eliishaa, Ninki Mucjisooyinka

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ma aysan jirin dibiyo ku filan jiididda harqoodka dhulka lagu falo.

Mid dheeraad ah baa loo baahnaa. Taasi kama aysan joojinin wiil dhalinyaro ahaa oo la odhan jiray Eliishaa!




Si sahlan buu isugu biidhiyey kooxdii ka dibi ahaa isaga qudhiisa, galayna meeshii ka banaanayd kii maqnaa meeshiisii.  Waxayna ahayd inuu xoog leeyahay, yahay nin caqli badan-hawlkarna ah.





Isla intii uu Eliishaa dhulka qodayay, nebigii Ilaah Eliiyaah baa u yimid oo u yeedhay isaga. Wiilkii dhalinyarada haa wuxuu ka tagay beertiisii si uu ugu adeego Ilaah. Maalin baa haddaba, Ilaah Eliiyaah samada dabayl cirwareen ah ugu qaaday. Haddase Eliishaa waxaa weeye nebi Ilaah oo reer binuu Isra'iil ah.



Inkasta oo uu ka xumaaday sababta Eliiyaah u tagay, wuxuu Ilaah ka baryay inuu awood siiyo sida Elliyaah oo kale. Markaasaa Eliishaah qaaday duuduubaygo'ii Eliiyaah, oo biyihii wabiga ee socday ku dhuftay. Oo biyihii baa kala qaybsamay! Hadda Eliishaa wuxuu gartay inuu Ilaah la jiro isaga.




Intii uu Eliishaa ku sii
socday magaalo la
yidhaahdo Beytel,
ayaa caruur yar yar
magaa-ladii ka soo bxday
oo ku majaajilootay
isagii. Wax laga naxo
ayan ku dhacay iyagii.
Markaasaa dhirtii waxaa
ka soo baxay laba Orso
oo dheddig ah oo waxay
dildilaac-sadeen laba iyo
afartankii caruurta
ka mid ahaa.

Maalin baa Eliishaa la kulmay carmali oo aan iska bixin karaynin deyn lagu lahaa.




Ninkii daynta ku lahaa lacagtii bedelkeeda wuxuu doonay inuu u qaato labadeedii wiil addoon ahaan.
"Tag oo weelal weyddiiso derisyadaada ...... weelal madhan," Eliishaa ku yidhi.
Ilaah wuxuu doonayaa inuu naagtan wax cajiib ah u sameeyo.

Naagtii carmasha ahayd waxaa guriga u yaalay dheri saliid oo yar keliya. Laakiin dherigaa yar wuxuu ku filnaa inuu wada buuxiyo dheryihii kale oo idil! Maxaad u malayn lahayd haddii ay jiraan dhuumo tubooyin ah maalmahaas, may kuu ahaan lahayd Ilaahay inuu buuxiyo kuwaa, in badan? Naagtan Carmalk ahayd way iibisi saliiddii wiilasheediin way badbaadisay.



Naag kale iyo ninkeedii baa ka sameeyey gurigooda qol u gaar ah Eliishaa inuu joogo maraca uu halkaa soo marayo. Qolkii waxay dhigeen sariir, miis, kursi iyo laambad. Qolkaa mar walba wuxuu u xidhnaa oo u diyaarsanaa Eliishaa.



Eliishaa wuxuu la yaabanaa sidii uu ugu abaalgudi lahaa qoyskan naxariista leh. Markii uu ogaaday inaysan caruur lahayn, wuxuu yidhi wax ay ku adag tahay fahmideeda naagtii inay rumaysato. “Markii wakhtigan soo wareego xiligan oo kale wiil baad laabta ku qabsan doontaa.” Waa la hubaa, sanad ka dib wiil baa dhalanaya.




Dhowr sanadood ka dib isla ilmihii oo beerta la jooga aabbihii. “Madaxayga, madaxayga,” ku qaylliyay wiilkii. Markii ay u keeneen wiilkii hooyadiisii, wuxuu ku fadhiistay jilbaheedii ilaa iyo duhurkii, ka dibna wuu dhintay. Naagtii wiiilkii waxay dhigtay sariirtii taalay qolkii Eliishaa.


Kee baad ku fikiraeysaa inuu caawin karo?



Ma waxaad leedahay Eliishaa? Sax weeye taasi! Markaasay dameer kooreysatay oo dhaqso u aaday inay hesho isaga. Gurigedii buu yimid Eliishaa, keligii baa jaran jaradii aaday oo Rabbiga ayuu baryay.



Ilaahay noloshii wiilka buu u soo celieye. Eliishaa wuxuu u yeedhay naagtii oo ku yidhi, "Wiilkaaga qaado." Qiyaas siday bay ahayd farxadeeda!




Meel u dhow dhulka Suuriya waxaa ku noolaa sarkaal xukuma ciidan oo la odhan jiray Nacamaan.  Wuxuu ahaa geesi xoog badan, laakiin waxaa hayay cudurka xun haragga ku dhaca ee loo yaqaano baraska.

Nacamaan naagtiisa waxay haysatay gabadh yar oo addoomad ah oo laga qabsaday Israa'iliyiinta. Gabadhii yarayd baa ku tidhi, "Haddii keliya Namacaan u tagi lahaa nebiga jooga Israa'iil! Wuu ka bogsiin lahaa baraskan."



Namacaan markiiba wuxuu isu siduu ku arki lahaa nabigaa. Wuxuu qaaday lacag, dahab, iyo dhar qurxoon haddiyad ahaa.






Midiidinkii Eliishaa ayaa u soo baxay oo ku yidhi, “Tag oo ku mayro webiga Urdun toddoba jeer ku maydho, jidhkaaga mar kaluu kuu soo noqon doonaa, oo nadiif baad ahaan doontaa.”



Nacamaan wuu cadhooday oo tagay. Miyuuna isaga ku maydhan karin oo nadiifin karin, biyaha wabiyada isaga dhulkiisa, Suuriya, wuu ka soo noqday oo horay buu u sii beegsaday halkii degaanka uu u lahaa.



Nasiibwanaagga Nacmaan, addoomadiisii ayaa kala hadlay inuu addeeco amarka Ellishaa. Haddaba Nacamaan wuxuu u dhaadhacay muquurtay webigii Urdun min toddoba jeer. Oo Nacamaan baraskii waa ka bogsaday! Dabadeed Nacamaan wuxuu caabuday Ilaaha runta ah, Ilaaaha Eliishaa, Rabbigii

isaga ka bogsiiyey baraska.



Ilaah wuxuu sii isticmalay addoonkiisa Eliishaa xitaa isagoo dhintay. Maalin baa nin la aasayey qabuuraha meel ku agtaal meeshii waagii hore lagu aasay Eliisha. Markii ninkii dhintay maydkiisii taabtay lafahii nebiga ee horey u aasnaa, ninkii wuu soo noolaaday oo ku istaagay lugihiisii. Runtii, Ilaah baa muujiyey xoog weyn toos addoonkiisa daacadda lahaa ee Eliishaa.

Eliishaa, Ninki Mucjisooyinka

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Boqorradii Labaad 2-13

“Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa.” Sabuurka 119:130

# Dhammaad

25

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16